



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-402/122019

Taar: 05/12/2019

Wareegto Madaxweyne

Dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka 2020-ka

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-41/849/2019, ee ku taariikheysan 02/12/2019, ee ay ku ansixiyeen Miisaaniyadda Sannadka 2020-ka;

Waxaan soo-saaray;

Dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka 2020-ka oo ka kooban Miisaaniyadda Dawladda Dhexe, Dawladaha Hoose, Hay'adaha Madaxbannaan iyo Deeqaha Caalamiga ah oo dhan SL.SH/= 2,751,304,880,098 (Laba Tirilyan, Toddoba Boqol Kow iyo Konton Bilyan, Saddex Boqol iyo Afar Milyan, Siddeed Boqol iyo Siddeetan Kun, Siddeed iyo Sagaashan Shillin Somaliland ah). Miisaaniyaddu waxay dhaqan-gal noqon doontaa 01 January 2020.



Adhaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Ref: WM/02/08-01/ /2019

Date: 19-11-2019

Ku: Shirgudoonka Golaha Wakiiladda

Hargeysa

Ujeedo: Soo Gudbinta Miisaaniyadda Qaranka ee 2020

Mudanayaal,

Maanta oo ay taariikhdu tahay **19-11-2019**, waxaa ii Sharaf ah inaan idiin soo gudbiyo Miisaaniyadda Dawladda ee Sannadka 2020-ka. Mudanayaal, Anigoo ku hadlaya Magaca Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda oo gudanaysa waajibaadka Dastuuriga ah ee Qodobka **55^{aad}** farqadiisa **1^{aad}**. iyo xeerka Maamulka Maaliyadda ee Xeer No. **75/2016** qodobkiisa 5aad, oo waajibinaya inaan idin horkeeno Miisaaniyadda **29^{aad}** ee qarankani yeesho, si aad waajibkiina uga gudataan.

Alla Mahad Leh

Dr. Sacad Cali Shire
Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda

Table of Contents

Shaxda Miisaaniyadda Wasaaraddaha & Hayaaddaha 2020	IV
1. Hordhac.....	1
2. DULMARKA GUUD EE DHAQAALAH.....	2
2.1. HEERKA GUUD EE WAX-SOOSAARKA GUDAHA	2
2.2. Sicir-bararka	2
2.3. Heerka sarifka	3
2.4. Ganacsiga	4
2.5. Wax-Soo-dejinta.....	5
2.6. Maalgelinta.....	6
3. WARBIXINTA WAXQABADKA MIISAANIYADDA 2019	6
3.1. Dakhli Ururinta Jan-Oct.....	6
3.1.1. Warbixinta Cashuuraha Berriga.....	7
3.1.2. Warbixinta Kastamadda:.....	7
3.2. War- bixinta kharashka Jan-Oct 2019	8
3.2.1. Maamulka Kharash Bixinta	8
3.2.2. Mashaariicda Horumarineed ee Miisaaniyadda 2019-ka.....	9
4. Guud marka Miisaaniyadda 2020	10
5. Odoroska Dakhliga Sanad Miisaaniyadeedka 2020	11
5.1. Meelaha korodhka dakhligu ka imanayo 2020	11
5.2. Faah-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo	11
6. SIYAASADDA MIISAANIYADDA 2020.....	14
6.1. Siyaasada Maaliyadeed (fiscal policy)	14
6.1.1. Isku dheeli tirka Dakhliga iyo kharashka	14
6.1.2. Kor u qaadida saamiga ay Cashuuraha berrigu ka yihiin Dakhliga guud.	14
6.1.3. Ilaalinta iyo kobcinta wax-soosaarka gudaha	14
6.1.4. Kaydka ku -talo galka Dhacdooyinka lama filaanka (<i>Contingency fund</i>),	14
6.1.5. Joojinta qaadista lacagaha aan sharciga ahayn (illegal fees).....	14
6.1.6. Fududeynta Nidaamka Cashuur bixinta.....	14
6.1.7. Hirgalinta dhamaan qaybaha Nidaam Xisaabeedka is-wada ee (SLFMIS).....	14
6.1.8. Diiwaangalinta Cashuur Bixiyayaasha.....	15
6.2. Siyaasadda lacageed (Monetary policy).....	15
6.2.1. <i>Sicir bararka:</i>	15
6.2.2. Isku bedelka Sarifka lacagaha	15
6.2.3. Isku soo dhawaynta sarifka suuqa iyo ka dowladda	15
6.3. MUDNAANTA MIISAANIYADDA 2020 (budget priorities)	15
6.3.1. Nabadgalyada:	15
6.3.2. Ictiraafka:	15

6.3.3.	Doorashooyinka	16
6.3.4.	Caafimaadka.....	16
6.3.5.	Waxbarashada	16
6.3.6.	Biyaha.....	17
6.3.7.	Garsoorka.....	17
6.3.8.	Maamul Daadajinta.....	17
6.3.9.	Horumarinta Dhalinyarad iyo Shaqo abuurka	17
6.3.10.	Warshadaha iyo Maalgashiga	18
6.3.11.	Ilaalinta Deegaanka iyo ku talo galka Dhacdooyinka lama filaanka	18
6.3.12.	Waxsoo-saarka.....	18
6.3.13.	Horumarinta Tiknolojiyada (ICT)	19
7.	Mashaariicda 2020.....	19
8.	WADAAGAYAASHA MIISAANIYADDA 2020 (2020 sector allocation)	21
9.	FAAH-FAAHINTA WADAAGAYAASHA 2020 (2020 budget sectors)	22
9.1.	Dhaqaalaha:.....	22
9.2.	Waxbarashada:.....	22
9.3.	Tamarta	22
9.4.	Deegaanka.....	22
9.5.	Maamulka.....	23
9.6.	Caafimaadka	23
9.7.	Kaabayaasha Dhaqaalaha.....	24
9.8.	Waxsoo-saarka	24
9.9.	Amaanka iyo Difaaca	24
9.10.	Biyaha	24
9.11.	Wadaagaha kale (crosscutting Sector).....	25
10.	Soo koobida guud ee Madaxyada Miisaaniyadda 2020	25
10.1.	Soo koobida Miisaaniyadda 2020 oo Madaxaysan	25
10.2.	Faah-faahinta soo koobida Miisaaniyadda 2020 oo Madaxaysan	26
10.2.1.	Kharashka Shaqaalaha	26
10.2.2.	Hawl socodsiinta	26
10.2.3.	Hantida Raagta.....	27
10.2.4.	Mashaariicda Kale ee Dawladda	27
10.2.5.	Kaalmooyinka Dawlada	28
	Miisaaniyadda Guud ee 2020.....	29
	Qorshaynta Miisaaniyadda 2020 Ee Qaybaha Dalka	31
	Qorshaha Isticmaalka ee Miisaaniyadda 2020.....	34

Shaxda Miisaaniyadda Wasaaraddaha & Hayaaddaha 2020

Shaxda 1: Heerka Guud ee Wax-soosaarka Gudaha oo La filayey, Isagoo dhab ah (Qiimaha aan isbedelin ee 2015), malyuun Doolaka Maraykanka (\$US)	2
Shaxda 2: Sicir-bararka u Sarreeya ee Sannadka ku dhammaaday December.....	3
Shaxda 3: Isu bedelka Somaliland shilling iyo dollarka	4
Shaxda 4: Dhoofka Xoolaha 2012 -2018.....	5
Shaxda 5: Mugga Wax-soo-dejinta 2012 -2018.....	5
Shaxda 6: Tirada liisannada ganacsi e la bixiyey 2012 ilaa 2019	6
Shaxda 8: liiska Mashaariicda 2019	9
Shaxda 9: Miisaaniyadda Guud ee 2020	10
Shaxda 10: Soo koobida guud ee dakhliga 2020	11
Shaxda 11: Dakhliga casuuraha berriga oo deegaameysan	11
Shaxda 12: Dakhliga kastamada oo deegaameysan:	12
Shaxda 13: Dakhliga Miisaaniyadda 2020 oo Madax-xigaysan	12
Shaxda 14: Soo koobida Madaxyada Miisaaniyadda 2020	25
Shaxda 16: Mushaharka Madaxweynaha	42
Shaxda 17: Mushaharka Madax-weyne ku xigeenka.....	43
Shaxda 18: GUDIDA QARANKA EE LADAGAALNKA AIDS-ka.....	44
Shaxda 19: GOLAHA GUURTIDDA	46
Shaxda 20: GOLAHA WAKIILADA	48
Shaxda 21: MAXKAMADA SARE	50
Shaxda 22: XEER-ILAALINTA GUUD EE QARANKA	52
Shaxda 23: HAY'ADDA SHAQAALAH DAWLADA.....	54
Shaxda 24: HANTI-DHAWRKA GUUD EE QARANKA	56
Shaxda 25: MADAXTOOYADA	58
Shaxda 26: CIIDANKA ILAALADA MADAXTOOYADA	60
Shaxda 27:GARYAQAANKA GUUD	62
Shaxda 28: HAY'ADDA SIRDOONKA QARANKA	64
Shaxda 29: JIMCIYADA MUJAAHIDIINTA SOOYAAL	66
Shaxda 30: WASAARADDA ARIMAH DIBADDA	67
Shaxda 31: W. CADAALADA IYO GARSOORKA	69
Shaxda 32: CIIDANKA ASLUUBTA	71
Shaxda 33: MAXKAMADA HOOSE	73
Shaxda 34: GUDIGA XUQUUQAL-INSAAANKA QARANKA	75
Shaxda 35: WASAARADDA ARRIMAH GUDAHA	77
Shaxda 36: CIIDANKA BOOLIISKA.....	79
Shaxda 37: CIIDANKA ILAALADA XEEBAHA	81
Shaxda 38: CIIDANKA SOCDAALKA	83
Shaxda 39: CIIDANKA DAB-DEMISKA QARANKA SOMALILAND	85
Shaxda 40: WASAARADA W/FAAFINTA IYO WACYIGALINTA	87
Shaxda 41: W.GAASHANDHIGA.....	89
Shaxda 42: CIIDANKA QARANKA	91
Shaxda 43: W. QORSHAYNTA QARANKA IYO H. QARANKA	93
Shaxda 44: WASAARADA H. MAALIYADA.....	95
Shaxda 45: W. GANACSIGA, WARSHADAH IYO DALXIISKA	98

Shaxda 46: W.MACDANTA IYO TAMARTA	100
Shaxda 47: W. Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka	102
Shaxda 48: WASAARADA H. BEERAHA	104
Shaxda 49: W. XANAANADA XOOLAHA IYO KALLUUMAYSIGA	106
Shaxda 50: W. ISGAADHSIINTA IYO TIGNOOLOJIYADA	108
Shaxda 51: W. WAXBARASHADA IYO SAYNISKA.....	110
Shaxda 52: AGAASIMKA TACLIINTA SARE	113
Shaxda 53: GUDIDA TACLIINTA SARE	115
Shaxda 54: W. HORUMARINTA H. CAAFIMAADKA	117
Shaxda 55: KOMISHANKA QARANKA MIHNADLEYDA CAAFIMAADKA.....	119
Shaxda 56: W.DIINTA IYO AWQAAFTA.....	121
Shaxda 57: Hay'adda Diiwanka Sakada iyo Samafalka	123
Shaxda 58: W. HAWLAHA GUUD, DHULKA IYO GURIYAYNTA	125
Shaxda 59: H.DUULISTA HAWADA IYO MADAARADA	127
Shaxda 60: WASARADA XIDH. GOLAYAASHA IYO A. DISTOORKA	129
Shaxda 61: GUDIDA DIB-UHABAYNTA SHURUUCDA	131
Shaxda 62: WASAARADA SHAQO GALINTA, ARIMAHA BULSHADA, IYO QOYSKA	132
Shaxda 63: WASAARADA CIYAARAHA IYO DHALINYARADA	134
Shaxda 64: GUDIDA DOORASHOYINKA QARANKA.....	136
Shaxda 65: GUDIDA QANDARAASYADA QARANKA.....	138
Shaxda 66: HAY'ADA U DIYARGAWGA AAFOOYINKA IYO KAYDKA RAASHINKA QARANKA.....	140
Shaxda 67: HAY'ADDA DHAWRISTA TAYADA (Q. C).....	142
Shaxda 68: KOMISHANKA MAAULWANAAGA & LA DAGAANKAKA M/MAASUQA.....	144
Shaxda 69: H. QAXOONTIGA IYO BARAKACAYAASHA	146
Shaxda 70: W.DEEGAANKA IYO HORUMARINTA REERMIYIGA	148
Shaxda 71: GUDIGA FURASHADA URURADA.....	150
Shaxda 72: WASAARADA H. MAALGASHIGA.....	152
Shaxda 73: WASAARADA H. BIYAHA	154
Shaxda 74: Mashaariicda Baanka Adduunka 2020.....	156

Liiska Jaantusyada

Jaantuska 1: Sicir-bararka u sarreeya ee January 2018 ilaa June 2019, oo laga soo shidaal-qaadanayo salka 2012	3
Jaantuska 2: Heerka Sarrifka Shilinka Somaliland iyo Doolarka Maraykana ee January 2019 ilaa June 2019.....	4
Jaantuska 3: Xoolaha ka dhoofay dekedda Berbera laga bilaabo 2005 ilaa 2018.....	5
Jaantuska 4: Qiimaha billaha ah ee wax-soo-dejinta 2018.....	5
Jaantuska 5: Tirada Kiishashaka Shimiito ee soo galay Somaliland 2005 ilaa 2018	6
Jaantuska 6: Warbixinta Kharashka Jan-Oct 2019	8
Jaantuska 7: Wadaagayaasha Miisaaniyadda 2020	21
Jaantuska 8: Qayb qaybinta kharashaadka oo waaxaysan	26

1. Hordhac

Iyada oo la raacayo nidaamka Geedi-socodka Diyaarinta Miisaaniyadda ee Xeerka Maamulka iyo Maaliyadda Xeer Ln 75/2016, waxay Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu u raacday Diyaarinta Miisaaniyadda iyada oo fulineysa talaabooyinka:

1. Diyaarinta Xaashida Muuqaalka Guud ee Miisaaniyadda 2020-ka.
2. Sar-goynta Mudnaanta kharash-bixinta Miisaaniyadda 2020-ka.
3. Diyaarinta Siyaasadda Dhaqaalaha Guud iyo Maaliyadeed ee Mudadda dhexe, 2020-2022-ka.
4. Wada tashiga Guddi hoosaadka Dhaqaalaha iyo Miisaaniyadda ee Golaha Wakiiladda.
5. Doodda Miisaaniyadda ee Wasaaraddaha iyo Hay'addaha.
6. Gudbinta Miisaaniyadda ee Golaha Wasiiradda.
7. Gudbinta Miisaaniyadda ee Golaha Wakiiladda.

2. DULMARKA GUUD EE DHAQAALAHA

2.1. HEERKA GUUD EE WAX-SOOSAARKA GUDAHA

Dhaqaalaha Somaliland waxa hoos-u-dhac la taaban karo ku keenay Abaarihii 2017 iyo xayiraaddii xoolaha ee Saudi Arabia ee 2015. Heerka Guud ee Wax-soosaarka Gudaha ee asalraaca ahi waxa uu sannadka 2017 ka badnaa 62% kii 2012, halka koritaanka dhabta ah ee Heerka Wax-soosaarka Guud ee Guduhu ahaa 11% isla labadaa sannadood ee la is barbardhigay. Heerka wax-soosaarka Guud ee Gudaha ee dhabta ahi waxa uu hoos ugu soo dhacay sannadkii 2015 0.7%, halka uu ka ahaa 4.6% sannadkii ka horreeyey ee 2014. Dhaqaaluhu waxa uu soo kabtay sannadkii 2016 2.1% Heerka Guud ee Wax soo saarka Gudaha, waxa se mar kale uu hoos u dhacay 1% sannadkii 2017 oo ay sababtey abaartii dalka ku dhufatey.

Inkasta oo aan laga hayn tiro rasmi ah wixii ka dambeeyey 2017, haddana muujiyayaasha horumarka dhaqaalaha guud waxay muujinayaan in loo soo noqday koritaan dhexdhexaad ah sannadkii 2018. Koritaanka Wax-soo dejinta, qaadashadda liisamada ama ruqsadaha Wax-soodejinta iyo meheradaha, mugga shimiitada waddanka soo geleysa, ayaa muujinaysa in dhaqaaluhu kordhay sannadkii 2018. Horumarka dhinaca cimilada iyo deeganka ku yimid sida roobabka oo batay 2019, kor-ukaca baahiyaha adeegyada loo qabo, soo-kabashada xoolaha ee roobabka batay la socda, iyo badh-qaadida Sucuudiga Xiliga Mawsimka Xajka ee xayiraaddii xoolaha waxa ay dhammaantood muujinayaan koritaan ka muuqda 2019.

Shaxda 1: Heerka Guud ee Wax-soosaarka Gudaha oo La filayey, Isagoo dhab ah (Qiimaha aan isbedelin ee 2015), malyuun Doolarka Maraykanka (\$US)

Sannad	Heerka Guud ee Waxsoosaarka Gudaha ee asalraaca ah	% Δ	Heerka Guud ee Waxsoosaarka Gudaha ee Dhabta ah*	Δ
2012	1,586	-	2,014	-
2013	1,831	15%	2,088	3.7%
2014	2,011	10%	2,185	4.6%
2015	2,201	9%	2,201	0.7%
2016	2,322	5%	2,248	2.1%
2017	2,573	11%	2,226	-1.0%

*Qiimaha joogtada ah ee 2015

Waxaa laga soo xigtay: Qeybta tirakoobka ee waaxda, W/Qorshaynta& Horumarinta

2.2. Sicir-bararka

Sida kor lagu soo sheegay faraqa u dhexeeya Heerka Guud ee Wax soo saarka Gudaha ee asalraaca ah iyo kan dhabta ah ee sannad 2012 iyo 2017, waxa uu muujinayaa heer sicir-barar oo aad u sarreeyaa isla sannadahaa. Jaantuska 4aad waxa uu muujinayaa in sicir-bararka u sarreeya lagu arkayo sannadha 2015 iyo 2017 oo kala ahaa 13.6% iyo 18.4%. Marka bil-bil loo eego, **Shaxda 1aad** waxa ay muujineysaa inuu hoos u socdey sicir-bararku iyada oo bishii January ee 2018 uu ahaa 18.9% halka bisha lixaad ee June 2019


uu ka noqday 4.5%. Celceliska sicir-bararka ee qaybta hore ee 2019 waxa uu ahaa 6.3% marka la barbardhigay isla bilahaa sannadkii ka horreyey ee 2018 oo uu ahaa celcelisku 18%.

Shaxda 2: Sicir-bararka u Sarreeya ee Sannadka ku dhammaaday December

Sannadka	Index	Heerka
2012	100	
2013	108.43	8.4%
2014	115.87	6.9%
2015	131.63	13.6%
2016	133.12	1.1%
2017	157.63	18.4%
2018	170.17	8.0%
2019 ¹	174.09	4.5

Xigasho: Waaxda tirakoobka ee , W/Qorshaynta & Horumarinta

Jaantuska 1: Sicir-bararka u sarreeya ee January 2018 ilaa June 2019, oo laga soo shidaal-qaadanayo salka 2012



Hoos-u-dhaca sicir bararka waxa loo nisbeeyey heerka sarrifka oo caadiyoobey, soona kabanayey celcelis ahaan. Qiimaha oo ka soo naasilmey badeecadaha qaarkood sida khudaarta labadeeda nooc (vegetables and fruits), adeegyada iyo tamarta (sida: gaasta, batroolka & naaftada) ayaa iyana door ka qaatay. Waxa intaa dheer ka-soo-kabashada abaarihii iyo hoos-u-dhacii xoolaha; waxa iyana qayb muuqata ku lahaa roobabka mahiigaanka ah ee da'ay 2019 oo dib u soo nooleeyey wax-soo-saarkii dhaqaalaha oo saamayn ku yeeshay hoos-u-dhaca qiimayaasha.

2.3. Heerka sarrifka

Ka dib xayiraaddii dhoofka xoolaha ee Sucuudiga bilowgii 2015, Sarrifka Shilinka Somaliland ee Doolarka Maraykanku aad ayuu hoos u dhacay iyada oo uu ka kacay SISH 7,556 ilaa SISH 9,328 ka hor intii aanu kor u sii fanan 2018 sida ka muuqata Jaantuska 5aad iyo Shaxda 2aad. Sannadka 2019, waxa sarrifka Shilinku u soo xogaystay heer uu soo gaadho bishii May SISH 8,308 oo ah markuu u horeeyey sarrif ahaan, halka uu bisha June noqday SISH 8,400. Lixda bilood ee u horreeyay 2019, waxa sarrifku noqday SISHs 8,729 halkii Doolar ee Maraykan, oo u dhiganta 16.9% in uu ka soo xoogeystey bilihii u dhigmey ee 2018.


¹Sicir baraarka waa lixda bilood hore 2019

Shaxda 3: Isu bedelka Somaliland shilling iyo dollarka

Sannad	Sarrifka	% Δ
2012	6,464	
2013	6,838	5.8%
2014	7,129	4.3%
2015	7,564	6.1%
2016	7,556	-0.1%
2017	9,328	23.5%
2018	10,189	9.2%
2019 ²	8,729	-14.3%

Xigasho: Bangiga Somaliland

Jaantuska 2: Heerka Sarrifka Shilinka Somaliland iyo Doolarka Maraykana ee January 2019 ilaa June 2019



Heerka Sarrifka ee Shilinka ee ku soo xoogeystey Doolarka waxa loo nisbeeyaa badiba xoojinta nidaamka siyaasadda Maamulka Maaliyadda ee kharsh-bixinta iyo Bangiga Dhex ee Somaliland oo joogteeyey guurguurka sarrifka si uu ugu celceliyo yool ah SLS 8.500 halkii Doolar ee Maraykanka ah. Maadaama dalku ku shaqeeyo labada lacagoodba, waxa heerkana loo dejiyey qofka ku mushahar qata Shilinka Somaliland iyo kan ku qaata Doolarka Maraykanka labadaba loo tixgeliyo. Tallaabooyinka Bangiga waxa ka mid ahaa xaddidaad uu ku sameeyey labada shirkadood ee u waaweyn ee adeegyada lacagaha isaga oo amray inaan laga dhex sarrifan karin xaddi lacageed oo ka yar US\$ 100. Waxa kale oo Bangigu xaddiday dhaqdhaqaaqa sarriflayaasha lacagaha qalaad iyada oo sarriflaha lagu qabto inuu wax ku beddeley in ka badan 2% heerka Sarrifka ah ee rasmiga ah lagala noqon doono ruqsadda ganacsiga, lagana mamnuuci doono ka-ganacsiga suuqa sarrifka.


2.4. Ganacsiga

Dhoofka Xoolaha

Faraq hoos-u-dhac ah oo ballaadhan ayaa ku yimid ganacsiga Somaliland, kaas oo si weyn u sibiibixday 2015, mar kalena sidoo kale hoobtay 2018. Tirada Xoolaha la dhoofiyey sanadkii 2018, tusaale ahaan, waxa ay ahayd tii u hooseysey ilaa 2007 iyada oo 26% dhoofku hoos ugu soo dhacay (492,649). Iyada oo dhaqaaluhu ka soo kabanayo abaarihii iyo xayiraaddii xoolaha, saadaasha ganacsiga ee 2019 waa mid togan. Lixda bilood ee u horreeya 2019 waxa ay ka badan tahay 22% bilihii u dhigmeyey ee 2018.

²Isbedelka sicirka sarrifka celcelis ahaan waa lixda bilood hore, 2019

Jaantuska 3: Xoolaha ka dhoofay dekedda Berbera laga bilaabo 2005 ilaa 2018




Xigasho: xogta laga helay W/Qorshaynta& Horumarinta

2.5. Wax-Soo-dejinta

Si Sannadle ah ayaa wax-soo-dejinta Somaliland hoos ugu dhacaysey sannadihii 2014, 2015, iyo 2017. Qiimaha guud ee wax-soo-dejinta 2018 qiimayaasha hadda jira waxa ay ahayd SLSH 2.7 tirilyan, halka ay ka ahayd qiimayaasha 2012 SI.Shs 1.6 tirilyan (la tixgeliyey sicir-bararka). Marka la dheehdo Shaxda 4aad, qiimaha Wax-soo-dejinta 2012 iyo 2018 labaduba kor ayay u socdaan celcelis ahaan. Xogta laga helay 2019, waxa ay muujinayaa in sidoo kale uu kor ugu socdo. Lixda bilood ee hore ee sannadka 2019 waxay muujinayaan in qiimaha wax-soo-dejintu yahay SI.Shs 1.6 tirilyan oo u dhiganta 59% qiimaha guud ee wax-soo-dejinta ee 2018 oo idil. Waxa xusid mudan in qiimaha kastamku aanu ahayn qiimaha dhabta ah ee qiima-sheegadyadu sheegayaan.

Jaantuska 4: Qiimaha billaha ah ee wax-soo-dejinta 2018



Shaxda 4: Dhoofka Xoolaha 2012 - 2018

Muddada	Tirada Xoolaha Dhoofay	% Isbeddelka
2012	3,512,433	5%
2013	3,161,795	-10%
2014	3,439,798	9%
2015	3,424,745	-0.44%
2016	3,074,899	-10%
2017	1,894,696	-38%
2018	1,402,047	-26%

Xigasho: Waaxda kastamka, W/H/Maaliyadda

Shaxda 5: Mugga Wax-soo-dejinta 2012 -2018

Sannadka	Mugga	% isbeddelka
2012	427,376,721	
2013	702,342,218	64%
2014	575,575,718	-18%
2015	463,955,765	-19%
2016	504,749,446	9%
2017	440,126,477	-13%
2018	538,636,414	22%

Xigasho: Waaxda Customka, W/H/Maaliyadda

2.6. Maalgelinta


Maalgelinta iyo Dhismaha

Tirada ruqsadaha ganacsiga ee la bixiyey iyo tirada shimiitada la soo dejiyey ayaa lagu qiyaasay heerka maalgelinta ee Somaliland. Sannadkii 2018, 687 liisan ayaa la siiyey meherado ama ganacsi oo u dhiganta inay ka badan tahay 77% heerkii 2012. Marka laga reebo 2014, koradhka bixinta liisannada ganacsigu si sanadle ah ayey u badaneysey. Lixda bilood ee u horreeya 2019, waxa la bixiyey ruqsado dhan 443 oo u dhiganta 64% liisannadii la bixiyey sannadka 2018 oo idil. Marka la eego roobabka iyo kor-u-hin角度ka dhaqaalaha ee guud, waxa la filayaa inay aad kor u sii kacaan ilaa sannadka 2019 dhamaadkiisa. Shaxda 5aad waxa ay tilmaamaysaa tirada shimiitada ee la soo dejiyey laga soo bilaabo 2005 ilaa 2018. Sannadka 2018 keligii, waxa la soo dejiyey 5.98 milyun oo kiish oo ahaa tiradii u badnayd ilaa 2005.

Shaxda 6: Tirada liisannada ganacsi ee la bixiyey 2012 ilaa 2019

Sannadka	Rusqadda	% Δ
2012	140	
2013	274	96%
2014	253	-8%
2015	264	4%
2016	452	71%
2017	525	16%
2018	687	31%
2019 ³	443	

Jaantuska 5: Tirada Kiishashaka Shimiito ee soo galay Somaliland 2005 ilaa 2018



3. WARBIXINTA WAXQABADKA MIISAANIYADDA 2019

3.1. Dakhli Ururinta Jan-Oct

Tobankii bilood ee Sanadka 2019, Dawlada Somaliland waxa u soo xarooday dakhli dhan SLShs **1,480** (Hal tiriliyan iyo afar boqol iyo sideetan billion), kaas oo **26%** ka badan dakhligii soo xarooday tobankii bilood **Jan _Oct** ee sanadkii 2018kii. ku talo-galkii Dakhliga la filayay in la helo Jan-oct 2019 wuxu ka hooseeya -0.3%, halka marka la barbardhigo isla xiligaa sanadkii 2018 uu ahaa hoos u dhacu -10%.

Dakhliga dhabta ee la rajaynay dhamaadka Sanadka 2019 wuxu noqonaya 1,777 (hal tiriliyan todoba boqol iyo Todobaatan iyo Todoba bilyan), kaasi oo 15% ka badan dakhligii dhabta ahaa ee soo xarooday 2018kii, oo ahaa 1,541 (hal tiriliyan shan boqol afartan iyo kow billion).

³Tirada ruqsadaha ee 2019, waa lixda bilood ee hore

3.1.1. Warbixinta Cashuuraha Berriga.

Waxa dadaal dheeraad ah laga sameeyey Tayeynta Maamulka iyo kordhinta dakhliyadda Cashuuraha berriga marka loo eego sanad Miisaaniyadeedkii 2018-ka.

Wasaaardu iyada oo maanka ku haysa muhiimadda dib-u-habenta Nidaamka maamulka Cashuuruhu (Tax Administration reform) u leedahay geedi-socodka helitaanka iyo kordhinta dakhli waarra, waxa:

1. La sameeyey, lana dhaqan-galiyo Xeer-nidaamiyayaasha Xeerka Dakhliga,
2. La sameeyey, lana qeybiyey Haggaha cashuur-bixiyaha Cashuuraha berriga,
3. La diiwaan-galiyey 6,000 Cashuur-bixiye, iyada oo la siinayo Summadda Aqoonsiga Cashuur-bixiyaha (TIN),
4. La abuurey:
 - I. Unugga maamulka iyo daba-galka Cashuuraha baaqdey,
 - II. Unugga baadhista iyo qiimeynta Cashuuraha la qabtey,
 - III. Unugga la socodka Cashuuraha dawlada hoose,
 - IV. Unugga cashuur-bixiyayaasha waaweyn,
5. La sameeyey nidaamka fariin wadaaga ee War-galinta iyo Mahad-celinta cashuur-bixiyaha,
6. La dhaqan-galiyey Cashuurta Adeegga Alaabta iyo Badeecadda (GST) ee Adeegyadda:
 - Korantadda,
 - Isgaadhsiinta
 - Hoteeladda
7. La fuliyey Qeybta Dakhli-qabashadda ee Nidaamka SLIFMIS-ka,

Talaabooyinka waxay kordhiyeen dakhligii Waaxda **22%** marka loo eego Sanad Miisaaniyadeedkii 2018-ka.

3.1.2. Warbixinta Kastamadda:

Kastamaddu waa **68%** odoraska Dakhliga Miisaaniyadeedka 2019-ka. Wasaaraddu iyada oo ogsoon Miisaanka dakhli ee ku meelaysan Waaxdan, waxay dajisay Qorsheyaan Maamul:

- I. Dib u Habeynta Maamulka Waaxda:
- II. Tababradda Maamulka iyo Hawl-wadeenadda,
- III. Qiimeynta iyo la xisaabtan Maamulka iyo Hawl-wadeenadda,
- IV. Haggaha La-dagaalanka La-baxsiga Alaabooyinka (**Anti-Contraband Manual**)
- V. Buugga Alaabooyinka ka mamnuuca ah Soo dejinta dhoofintaba
- VI. Haggaha Cashuur-dhaafyadda.

Fulinta qodobadani waxay salka u dhigeen kor ukac joogto ah oo ku yimaadda dakhli soo saarka waaxda.


Waxa uu Dakhliga waaxdu kor u kacay **26%** marka loo eego 2018-kii, sidoo kale waxa uu sare-maray 14% **Odoraskii Miisaaniyadda**

3.2. War- bixinta kharashka Jan-Oct 2019

Kharashka loo qoondeeyay in uu baxo bilaha Jan-oct ee Sanadkan 2019ka wuxuu ahaa **1,485,128,716,669 sh.**, hase yeeshee waxa kharash ahaan u baxay **1,267,462,482,378 sh.**, taasi oo u dhiganta, in **85%** uu baxay kharashkii loogu talagalay inuu baxo Jan-Oct, taasi oo macnaheedu yahay in kharash u dhigma **15%** aanu bixin lacag ahaana oo noqonaya **217,666,234,291 sh.**

Sababta kharashka u dhigma **15%** aan loo isticmaalin, waa iyadda oo lixdii bilood ee Sanadkan u horeeyay aan la siidayn kharashka Hantida raagta iyo Mashaariicda, balse la sii daayay lixdii biloodkii dambe, iyada oo la filayo in kharashaadkaasi bixi doono ka hor dhamaadka sanadkan.

Jaantuska 6: Warbixinta Kharashka Jan-Oct 2019



3.2.1. Maamulka Kharash Bixinta

Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu iyada oo fulinaysa Xeerka Maamulka Maaliyadda waxay diyaarisay isla markaana dhaqan-galisay:

- I. Xeer-nidaamiyaha Maamulka Maaliyadda ee Xeer LN 72/2016,
- II. Haggaha Hawl-socodsiinta iyo Xisaabinta Nidaamka Kharash-bixinta Qaranka,

III. In si dhameystiran loo adeegsado dhinaca Kharash-bixinta nidaamka Is-wadda ee SLIFMIS-ka

Dhinaca kale, iyada oo dawladdu xoojinaysa Nidaamka Xisaabaadka waxay la diyaariyey:

- I. Qorshaha Hir-galinta Nidaamka Caalamigga ah ee Xisaabaadka Dawladda (IPSAS Implementation Roadmap),
- II. Qorshaha Mideynta Khasnadda Qaranka (Single Treasury Account)
- III. Siyaasadda Diiwaan-galinta iyo Haynta Hantidda Qaranka,
- IV. Siyaasadda Maamulka lacagta naqadka ah,

Si loo fudeydiyo fulinta Qorshayaashan iyo Habraacyadan, waxa la fuliyey tababaro kor loogu qaadayo hawl-wadeenadda Wasaaraddaha iyo hay'addaha Dawladda ah.

Horumarinta Maamulka kharashaadku, waa tiirka tilmaamaya tayeynta adeeg-biixinta ku xusan Miisaaniyadda Dawladda.

3.2.2. Mashaariicda Horumarineed ee Miisaaniyadda 2019-ka

Dawladdu iyada oo mudnaanta siineysa Mashaariicda Horumarinta ee Wadaagayaasha arimaha bulshadda (Wax-barashadda, Caafimaadka iyo biyaha), Kaabayaasha Dhaqaalaha, Wax-soosaarka, Horumarinta Deegaanka Ammaanka iyo Difaaca Qaranka, waxay Miisaaniyadda 2019-ka laga fuliyey Mashaariicdan oo qaarkood dhammaadeen kuwa kalena socdaan oo la filayo inay dhamaadaan intan sanadku dhamaan :

Shaxda 7: liiska Mashaariicda 2019

N o.	Mashruuca
1	Dhismaha Guriga Gudoomiyaha G.Wakiiladda
2	Dhismaha fidinta Madaxtooyada, Muusiyamka hargaysa iyo Guriga Madaxtooyada Ceerigaabo
3	Dhismaha Maxkamadda Racfaanka Hargaysa & M.Oodwane
4	Dhismaha Xafiiska Gobolka Xaysimo
5	Dhismaha Xarunta Dabdemiska Berbera & Laascaanood
6	Iibsiga Qalabka Dabdemiska
7	Dhismaha Wasaaradda Beeraha
8	Dhismaha Cisbitaalka Ciidanka Qaranka (second face)
9	Dhismayaasha Wasaaradda H. Maaliyadda
10	Dhismaha Madxafka Berbera
11	Mashruuca Biyo Balaadhinta Hargeysa
12	Mashruuca Wajaale, Beer iyo Oodwayne
13	Mashruuca Abuur badinta
14	Mashruuca Saadaasha Hawada
15	Mashruuca JPLG
16	Mashruuca JPLG wasaaradda waxbarashada
17	Mashruuca Shaqo Qaran
18	Dhismayaasha Kale ee Dawladda (Maktabada Gebiley)
19	Mashruuca Kuuliyadda Tababarka Macalimiinta
20	Dhismaha Biriijka Burco
21	Dhismaha Jaamacada Sheekh
22	Dhismaha Jaamacada Ceerigaabo
23	Mashruuca JPLG ee Wasaaradda Caafimaadka
24	Dhismaha Xarunta NEDFORD
25	horumarinta Madaarada

26	libsigaHantida kale ee dawladda (Tax Way Lights)
27	Kharashka Doorashada
28	Kharashka Gurmadka Aafooyinka
29	libsiga Mishiinka Shaybaadhka (Tayada Cunada & Daawada)
30	Dhismaha Qalabka shaybaadhka ee berbera iyo Dhismaha xarunta Quality Control
31	Daryeelka Ceelasha
32	Mashruuca Waxsoosaarka iyo tarmintadhirta
33	Mashruuca Dhiraynta
34	Kh. Waxkaqabashada Xaalufka
35	Sanduuqa H.dhalinyarada
36	Horumarinta Wadooyinka
37	libsiga Doonyaha iyo Maraakiibta
38	2% Horumarinta Gobolada Bari
39	Isctiraaf raadinta
40	Dhismaha qaybta police Gebiley
41	Dhismaha Jeelasha Bursco, Gebilay, Boorama,Mijocaseeye iyo Oodweyne
42	libsigaHantidda kale (Qalabka idaacada iyo TV-ga)
43	Dhismaha Wasaaradda Warfaafinta
44	Dhismaha Gurig aMadaxweyne ku xigeenkii hore
45	Hoostada Gaaadiidka Dawladda
46	M.Tijaabada iyoTaran kaxoolaha
47	M.Qoolcaday iyo Aroori
48	libsiga Mishiinada Laashashka iyo qalabka kaluumaysiga
49	Mashruuca Daawaynt Xoolaha
50	Dhismeyaasha Kale(Deked Kalluumaysi iy shaybaadhka xoolaha
51	QalabkaBoosaha & Isgaadhsiinta
52	Dhismaha xarunta, dugsiga qoton dabo iyo ina qarbooshe
53	libsiga Qalabka Xafiisyadda (Dugsiga KTM)
54	mashruuca qaybinta buugaagta dugsiyada hoose dhexe
55	Dhismaha Qabta umulaha HGH, Dhismaha Hospitalka Burco iyo dhismaha MCH kala ah Xadhig- Xadhig,Xayra,Caaqil yare,gatiitaley,,Xaaxi,Gogol wanaag,Qararo,,Sarmaanyo,Jameecada Caynaashe
56	libsiga Qalabka Caafimaadka (Cis Hargeysa iyo Burco)
57	Dhismaha Garoonka Timacade, Ceerigaabo, Burco iyo Ooweyne
58	libsiga roogaga burco iyo Berbera
59	Dhigista Roogaaga Garoomada Berbera &Burco
60	Dhismayaasha Ceelasha & Qodista Riigaga kala ah dhaamka iyo biyo galinta salaxlay, Taleex,,Wado bariis, iyo alaybaday
61	Mashruuca Biyo joojinta Dooxyada

4. Guud marka Miisaaniyadda 2020

Miisaaniyadda 2020 waxay ka kooban tahay Miisaaniyadda Dawladda Dhexe, Miisaaniyadda Hay'adaha Madaxa banaan ee Dawladda, Miisaaniyadda Dawladaha Hoose, Miisaaniyada Sanduuqa Horumarinta Somaliland e (Somaliland Development fund) iyo Miisaaniyadda Mashaariicda Baanka Aduunka. Isugeynta guud ee miisaaniyada sannadka 2020 waa **2,751,304,880,098 slsh** sida shaxda hoose ka muuqata. Miisaaniyadda dawladda dhexe waa **2,046,000,000,000 SLSH**, taas oo ka badan tii hore **263,845,540,000 slsh** oo u dhiganta **15%**.

Shaxda 8: Miisaaniyadda Guud ee 2020

Magaca	2019	2020	Faraqa
Dawladda Dhexe	1,782,154,460,000	2,046,000,000,000	263,845,540,000
Hay'addaha Madaxa Banaan	160,756,179,150	242,036,387,917	81,280,208,767
Dawladaha Hoose	255,490,228,023	326,748,574,181	71,258,346,158
Sanduuqa Horumarinta Somaliland	79,598,658,078	74,764,851,000	-4,833,807,078
Mashaariicda Baanka Aduunka	41,821,260,000	45,805,700,000	3,984,440,000
Mashruuca JPLG	14,499,678,000	15,949,367,000	1,449,689,000
Total	2,334,320,463,251	2,751,304,880,098	416,984,416,847

5. Odoroska Dakhliga Sanad Miisaaniyadeedka 2020

Odoroska Dakhliga 2020 wuxu noqon doonaa 2,046 (laba tirilyan iyo lix iyo afartan bilyab SLShs) taasoo muujinaysa in uu 15% ka badan yahay ka Sanadka 2019.

5.1. Meelaha korodhka dakhligu ka imanayo 2020

- Dakhliga ka imanaya hirgalinta Cashuuraha libka iyo Adeega ee (GTS) sida: Korantadda Isgaadhsiinta iyo Huteeladda.
- Dakhliga isku badalka sarifka lacagta qaadka
- Dakhliga dhaqan-galinta Cashuurta xakamaynta badeecadaha i.
- Dakhliga soo dejinta.
- Dakhliga dardar galinta Macaash macaashka shaqaalaha iyo faaiidada ganacsiga.
- Kirada Dekadda Berbera.

5.2. Faah-faahinta Goobaha uu Dakhligu ka imanayo

Shaxda 9: Soo koobida guud ee dakhliga 2020

Goobta	lacagta
Hadhaaga Qasnada 31/12/2018	3,723,820,708
kastamada	1,592,122,934,832
Cashuuraha Berriga	338,963,620,313
Kabka Dowladdaha Hoose	51,132,584,747
kiredda Dekedda Berbera	35,000,000,000
Wasaaradda Warfaafinta	136,077,400
Wasaaradda boosaha iyo isgaadhsiinta	1,648,825,046
Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha	17,710,930,466
Wasaaradda Beeraha	378,832,693
Wasaaradda Xanaanadda Xoolaha iyo Kalluumaysiga	754,627,776
Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta	521,316,282
Wasaaradda Hawlaha Guud	280,263,760
Wasaaradda Deegaanka	476,165,979
Hay'adda Duulista iyo Madaaradda	0
Deeqda banka aduunka ee (TMP)	3,150,000,000
Wadarta Guud	2,046,000,000,000 /=-

Shaxda 10: Dakhliga casuuraha berriga oo deegaameysan

Goobta	Lacagta
Berbera	59,618,445,877
Boorama	14,563,525,750
Burco	14,184,997,056
Caynabo	836,659,143
Ceerigaabo	2,587,345,779
Gabiley	6,551,471,181
Hargeisa	236,981,187,115
Laascaanood	2,399,656,912
Saylac	1,240,331,499
TOTAL REVENUE	338,963,620,313

Shaxda 11: Dakhliga kastamada oo deegaameysan:

Goobta	Iacagta
Allaybaday	674,544,184
Abaarso	252,542,479
Bali-gubadle	4,699,255,026
Beer	1,265,083,664
Berbera	1,070,402,574,292
Borama	17,000,009,302
Burco	617,050,610
Caasha-cado	18,475,827,436
Caynabo	2,031,547,308
Dilla	27,091,104
Farawayne	2,918,278,299
Hargeisa	1,295,602,439
Kalabaydh	275,441,535,481
Laascaanood	7,977,406,685
Lug-haya	3,767,972
Masalaha	49,134,385,810
Sanaag	639,524,600
Wajaale	23,807,871,805
Xariirad	305,863,951
Zaylac	110,307,031,525
Wadarta Guud	1,587,276,793,973

Shaxda 12: Dakhliga Miisaaniyadda 2020 oo Madax-xigaysan

2020 Madax-xigeenada	Faahfaahin	2019 Odoroska	2020 Odoroska	Faraqa
1110105	Cashuurta M/Macaashka Guryaha	9,948,947,129	11,288,643,911	1,339,696,782
1110201	Cash/M/M Ganacsiga	11,176,948,693	33,976,522,232	22,799,573,539
1110203	Withholding Tax	99,180,747	101,205,796	2,025,050
1120101	Cash/M/M shaqaalaha Rayidka ah	28,167,651,823	36,462,667,053	8,295,015,230
1120102	Cash/M/M Shaqaalaha Dawladda	52,753,460,568	56,844,920,789	4,091,460,221
1140301	Cashuurta badeecadaha iyo Adeega	260,417,028,135	247,836,181,081	- 12,580,847,054
1140804	Dakh/Gegeeda Diyaaradaha & Ajuurada (Landing Fee)	4,070,720,000	4,846,140,859	775,420,859
1140805	Khidmada adeega madaarada (Handling commision)	614,344,000	731,368,790	117,024,790
1140806	Daakhliga Faafinta & Iidhehda	124,987,367	136,077,400	11,090,033
1140807	Dakhliga kale ee Boosaha & Isgaadhsiinta	1,385,000,000	1,648,825,046	263,825,046
1140808	Dakhliga Liisamada Ganac/& Ruqsooyinka	16,679,573,019	17,710,930,466	1,031,357,447
1140812	Dakhliga ruqsadaha Isticmaalka Biyaha Bada	-	-	-
1140813	Dakhliga Ruqsadaha Beeraha	326,071,433	378,832,693	52,761,260
1140814	Dakh/Feega Kaluumaysiga Bada	640,225,333	754,627,776	114,402,443
1140815	Dakh/Liisamada/Ruqsooyinka Macdanta	464,807,993	521,316,282	56,508,288
1140816	Cashuurta Diiwaangelinta Hantida (Registrations)	15,780,835,335	19,867,368,622	4,086,533,287
1140817	Cashuurta Diiwaangelinta Maraakiibta & Doonyaha	1,866,469,320	1,908,226,523	41,757,203
1140818	Cashuurta Diiwaan gelinta (Contracts)	25,428,541,781	29,789,682,290	4,361,140,509
1140819	Dakh/Feega Royaltyga Dekeda	18,512,674,648	20,202,165,991	1,689,491,343
1140820	Fiiga Xanaanada Xoolaha (Holding ground)	214,267,061	218,641,917	4,374,855
1140902	Cashuurta Moorka	74,533,989,632	83,616,094,146	9,082,104,514
1140903	libsiga Tigidhada Dakhliga	1,522,396,952	1,553,480,902	31,083,950
1140904	Cash/Socdaalka Baabuurta (Road Tax)	6,947,368,672	7,457,688,721	510,320,049
1140905	Cashuurta Horumarinta wadada	17,018,628,339	19,102,721,843	2,084,093,505
1140906	Cashuurta Saaran shidaalka	20,493,378,223	25,851,061,948	5,357,683,726
1140907	Cashuurta Saaran wadooyinka (Road Levy)	1,025,255,481	1,202,071,059	176,815,578
1140908	Cashuurta Saaran shidaalka xuduudaha Beriga	-	504,000,000	504,000,000

1140910	Cashuurta Baaqatay ee kale (Arrears)	703,037,776	720,940,966	17,903,190
1140911	Cashuurta Saaran Dhoofinta Xoolaha (L/S/Levy)	43,721,124,300	51,516,047,021	7,794,922,721
1140912	Cashuurta Saaran liisamada Gaadiidka	588,117,267	600,229,871	12,112,604
1150101	Import Tax (Cashuuta soo dejinta)	725,938,413,604	872,198,720,274	146,260,306,670
1150201	Export Tax (Cashuurta Dhoofinta)	1,146,278,672	1,251,424,796	105,146,124
1150202	Cashuurta Dhoofka Xoolaha	19,586,287,107	21,759,160,326	2,172,873,220
1150601	Cashuurta Dekadaha (H.Tax)	82,561,721,337	94,332,006,586	11,770,285,248
1160101	Cashuuraha Kala duwan (Miselenous tax)	686,981,871	771,444,550	84,462,680
1160201	Cashuurta 2% Gobolada Bariga	79,736,999,839	86,712,472,911	6,975,473,072
1310101	Current grants from foreign governments	-	-	-
1320101	Deeqda Hayadaha Caalamiga ah	-	3,150,000,000	3,150,000,000
1410501	Kirada Dekeda Berbera	na	35,000,000,000	#VALUE!
1410503	Kirada Haamaha shidaalka Berbera	-	-	-
1410504	Dakhliga Kirada Guryaha & Bakhaarada	254,724,188	280,263,760	25,539,572
1420104	Dakhliga libka Khayraadka Dalka	466,638,267	476,165,979	9,527,712
1420105	Dakhliga gadida hantida Maguurta ah	-	-	-
1420201	Dakhliga Ajuurada Maxkamadaha	3,724,600,741	4,051,254,271	326,653,530
1420202	Dakh/Nootaayoooyinka	145,629,939	148,603,377	2,973,438
1420206	Fiiga libka Baasaaboorada	1,481,760,000	2,010,978,931	529,218,931
1420207	Fiisada Baasaboorada Ajanabiga	4,297,522,667	5,116,125,799	818,603,132
1420209	Cashuurta Gudubka Badeecadda	5,249,023,760	6,248,896,636	999,872,876
1420210	Dakhliga Numberka & Tijaabada Gaadiidka	11,103,805,568	12,690,182,970	1,586,377,402
1420211	Dakh/ Darawalnimada (Driving Licenses)	4,010,390,316	4,092,349,535	81,959,219
1420213	Khidmada Galista iyo bixista Baasaboorada Wadaniga	64,075,729	65,384,013	1,308,283
1420214	Fiiga Gelista iyo Bixista Madaarada (Ajanabiga)	24,029,771,759	28,233,912,315	4,204,140,556
1420215	Dakhliga Hay'adda Duulista	-	-	-
1420216	Dakhliga Buuga Lahaanshaha Gaadiidka	6,018,174,440	6,141,457,902	123,283,462
1420217	Embarcation Fee for foreigners	687,088,000	817,969,605	130,881,605
1420218	Dakhliga Mushaaxida Hawada (Navigation Fee)	3,102,588,800	3,693,592,866	591,004,066
1420219	Cashuurta Maamulka	89,216,127,435	98,200,379,232	8,984,251,798
1430101	libsigi xadhiga Jeelasha	563,510,485	575,546,862	12,036,376
1430103	Dakhliga Ganaaxyada	6,879,754,084	7,172,916,731	293,162,647
1440105	Saamiga Kabka Dawladaha Hoose	50,109,461,324	51,132,584,747	1,023,123,423
1140501	Cashuurta Xakamaynta Gaaddiidka soo daga	-	263,047,082	263,047,082
1140502	Cashuurta xakamaynta Tubaakada iyo waxii laga sameeyo	-	-	-
1140503	cashuurta xakamaynta gaadiidka raaxada	-	3,292,287,240	3,292,287,240
1140504	cashuurta xakamaynta cabitaanka aan alcohol ahayn	-	3,555,699,297	3,555,699,297
1140505	cashuurta xakamaynta badeecadaha kale	-	-	-
GST	Isgaadhsiinta	1,559,347,134	5,083,837,750	3,524,490,616
GST	korontada	1,965,757,500	6,408,830,957	4,443,073,457
				-
	Hadhaga qasnada sanadkii hore	-	3,723,820,708	3,723,820,708
Isu gaynta cashuuraha GST		3,525,104,634	22,327,523,034	18,802,418,400
Wadarta guud ee dakhliga		1,739,811,465,591	2,046,000,000,000	306,188,534,409
% Isbarbar dhiga korodhka sanadkii hore :		12.9	17.6	

6. SIYAASADDA MIISAANYADA 2020

6.1. Siyaasada Maaliyadeed (fiscal policy)

6.1.1. Isku dheeli tirka Dakhliga iyo kharashka

Siyaasadaa Miisaaniyadda 2020 waxay xooga saaraysaa in la isku dheeli tiro Dakhliga iyo kharashka. Taas macnaheedu waxa weeye in miisaaniyadda 2020 lagu sargooyo Dakhliga dhabta ee la filayo Sanadka 2020, iyadoo laga shidaal qaadanayo Dakhliga dhabta ah ee ina soo galay **jan-oc 2019**. Tani waxay meesha ka saari doonta sidii hore u dhici jirtay in kharashku ka bato Dakhliga la filayo.

6.1.2. Kor u qaadida saamiga ay Cashuuraha berrigu ka yihiin Dakhliga guud.

Siyaasada Miisaaniyadda ee 2020 waxay xooga saaraysaa in kor loo qaado saamiga Dakhliga Cashuuraha berrigu ka yihiin Miisaaniyadda guud sida dhaqan galinta Cashuuraha Iibka iyo Adeega hawsha ee (GST-da)

6.1.3. Ilaalinta iyo kobcinta wax-soosaarka gudaha

Si loo dhiiri geliyo loona ilaaliyo wax soosaarka dalka, waxay siyaasada Miisaaniyadda 2020 dhiirigalinaysaa ilaalinta waxsoo-saarka gudaha a iyada oo la dejiyay Siyaasado lagu ilaalinayo wax soosaarka gudaha sida in:

- La jideeyo Cashuur lagu ilaaliyo wax soo saarka gudaha.
- Suuq dibedeed loo raadiyo wax soo saarka gudaha.

6.1.4. Kaydka ku -talo galka Dhacdooyinka lama filaanka (*Contingency fund*),

Si qaranku uga gaashaaman karo intii awoodiisa ah arrimaha bani aadanimo ee dunida ka dhaca kuwaas oo ay sababaan sida: Fatahaadaha, Duufaanaadda, Abaaraha, Xanuunadda iyo wax kasta oo lama filaana, waxa miisaaniyadda 2020 looga qoondeeyay kharash lagula tacaalo arrimaha lama filaanka ah hadii ay dhacaan.

6.1.5. Joojinta qaadista lacagaha aan sharciga ahayn (*illegal fees*)

Iyadda oo la fulinayo Xeerka Maamulka Maaliyadda Qaranka, waxay Siyaasadda Miisaaniyadda 2020 xanbaarsan tahay in aaney Wasaarad aan ahayn Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu qaadi karin lacag la xidhiidha adeega loo qabanayo Muwaadinka.

6.1.6. Fududeynta Nidaamka Cashuur bixinta.

Siyaasadda Miisaaniyadda 2020 waxay dhiirigalinaysaa fududeynta nidaamka Cashuur bixinta, taasi oo qofka Cashuurta ku waajibtay si sahlan u bixin doono Cashuurta. Siyaasaddani waxay sidoo kale Hindiseysaa in la dhaqan-galiyo Nidaamka Cashuurbixinta ee la adeegsanyo Mobile-ka iyo isku-gudbinta Xisaabaha Baananka (E-Payment System)

6.1.7. Hirgalinta dhamaan qaybaha Nidaam Xisaabeedka is-wada ee (SLFMIS)

Sidaan wada ognahay waxa qaab-xisaabeedka dowladda lagu isticmaala nidaamka iswada ee Somaliland Finacial Information Sysytem (SLFMIS), sidaa awgeed waxa Miisaaniyadda 2020 qorshaysan in la dhaqan galiyo dhamaan qaybaha kale ee uu ka kooban yahay nidaamka SLFMIS-ku.

6.1.8. Diiwaangalinta Cashuur Bixiyayaasha.

Iyadoo laga duulayo in la helo xog dhamaystiran oo ku saabsan dhamaan Cashuur bixiyayaasha ayaa Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda waxa u qorshaysan inay diiwaan galiso dhamaan Cashuur bixiyayaasha isla markaana loo samaynayo Sumada Aqoonsiga Cashuur bixiyaha ee loo yaqaano TIN (Taxe Identification Number)

6.2. Siyaasadda lacageed (Monetary policy)

6.2.1. Sicir bararka:

Siyaasadda Miisaaniyadda 2020 waxay xooga saaraysaa xakamaynta sicir-barbarka, iyadoo yoolka Wasaaradda horumarinta Maaliyadda iyo Bangiga dhexe yahay in lagu hayo sicir barbarka 5%-6%, taasoo la dhaqan galiyay siyaasado lagu xakamaynayo sicir bararka- Sida:

- in isticmaalka shilling ka Somaliland la xoojiyo isla markaana shay kasta oo Dowladdu iibsanaayo lagu iibsado shilinka somaliland
- in lacagaha electoric ah ee lagu dhex isticmaalo mobile-da aan la iskugu diri Karin wax ka yar \$100

6.2.2. Isku bedelka Sarifka lacagaha

Siyaasada Miisaaniyadda ee 2020 waxay xooga saaraysaa siyaasada lacageed ee dhanka safirka lacagaha, taasi oo la doonaya in sarifka lagu hayo 8,000-8,500 slsh

6.2.3. Isku soo dhawaynta sarifka suuqa iyo ka dowladda

Waxa jira farqi u dhexeeya sarifka suuqa iyo ka dowladda, sidaa awgeed si loo yareeyo faraqa u dhexeeya sarifka lacagaha waxay siyaasada Miisaaniyadda 2020 xooga saaraysaa in la isku soo dhaweeyo safirka suuqa iyo ka dowladda.

6.3. MUDNAANTA MIISAANIYADDA 2020 (budget priorities)

Wadaagayasha mudnaanta la siinayo Miisaaniyadda 2020 (Sectorial priorities)

Gudidda siyaasada Miisaaniyadda Qaranku iyagoo raacaya Qorshaha guud ee Qaranka (NDP2) iyo wadaagayaashii mudnaanta la siiyay Miisaaniyaddii 2019, waxay gudidda siyaasada Miisaaniyadu Mudnaanta siiyeen sanad Miisaaniyadeedka 2020 wadaagayaashan hoos ku xusan.

6.3.1. Nabadgalyada:

Nabad galyadu waxay kow ka tahay qodobada mudnaanta la siiyay Siyaasadda Miisaaniyadda 2020. Si hadaba loo adkeeyo Nabad galyada, waxa Miisaaniyadda 2020 loo qoondeeyay Hay'addaha ku shaqada leh Nabadgalyada Miisaaniyadda kor loogu qaadayo adeega nabad galyada ee ay qabtaan sida:

- Tayaynta iyo kordhinta Ciidamada
- Qalabaynta Ciidamada
- Dhismayaaasa Jeelasha
- Dhismayaasha Saldhigyada, Rugaha iyo Qaybaha booliska
- Dhismayaasha Cusbitalada Ciidamada

6.3.2. Ictiraafka:

Tan iyo markii ay Somaliland madax banaanideeda la soo noqotay, waxay ku hawlanayd sidii ay beesha caalamka ugu heli lahayd Ictiraaf. hadaba si looga midho dhaliyo dedaalka xukuumadu ugu jirto Ictiraaf raadinta, waxa Miisaaniyadda Wasaaradda Arrimaha Dibeda ee 2020 guud

ahaanna la kordhiyay **4%** marka loo eego Sanadka 2019, halka kharashka Ictiraaf raadinta la kordhiyay **56.7 %**. Meelaha mudnaanta gaarka ah la siiyay waxa ka mid ah

- Kordhinta kharashka Ictiraaf raadinta
- Furista Safaarado iyo Qunsuliyado cusub
- Tayaynta iyo xoojinta Safaaradihii iyo Qunsuliyadihii hore
- Kordhinta tirada shaqaalaha Wasaaradda arrimaha dibeda

6.3.3. Doorashooyinka

Somaliland waa astaan kamida dalalka u taagan dimuqraadiyada Qaarada Afrika, isla markaana ay ka dhaceen Doorashooyin badan oo xor iyo xalaal ah, kuwaasi oo magac iyo maamuus ba u keenay qaranka.

Hadaba, sidaan wada ognahay waxa inagu soo fool leh qabsoomidda Doorashooyinka Golaha Wakiilada iyo Dowladdaha hoose, taasi oo Dowladdu u qoondaysay kharash dhan 28,800,000,000 sh (sideed iyo labaatan bilyan iyo sideed boqol oo milyan)

6.3.4. Caafimaadka.

Caafimaadku waa baahiyaha aasaasiga ah ee Aadamaha, sidaa awgeed iyadoo laga duulayo Qorshaha Qaranka (NDP2) iyo Hiigsiga Qaranka ee 2030 ee ku waajihan tayaynta iyo kor u qaadida adeega Caafimaadka, waxay Miisaaniyadda Sanadka 2020 ay muhiimad weyn siinaysaa horumarinta adeega caafimaadka Bulshada, taasi oo laga dheehan karo qoondada ay ugu talo gashay in adeega W.Caafimaadka kor loogu qaado isla markaana la kordhisay **17.65% Miisaaniyadda 2020.**

Sidaa darteed waxa mudnaan gaara la siiyay Mashaariicdan hoos ku xusan:

- Dhismayaasha Xarumaha caafimaadka (Health clinics)
- Dhismayaasha Xanaanooyinka hooyada iyo dhalaanka
- Iibsiga qalabka Caafimaadka ee kala duwan
- Shaqaalaysiinta Dhakhaatiirta takhasusaadka gaarka leh sida: Nephrologist, Urologist, Radiologist iyo Anesthesiologist
- Ku darida Miisaaniyadda saamiga dowladda laga rabo Mashaariicda adeega caafimaadka kor loogu qaadayo ee Ceerigaabo iyo laascaanood oo ah (70%)
- Iibsiga Gaadiidka adeega Caafimaadka (Ambulances)
- Gunaynta dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha Caafimaadka ee dhakhtarada baligubade, kala baydh iyo Xariirad
- Gunaynta dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha Caafimaadka ee Cusbitaalada TB ee Gobolada

6.3.5. Waxbarashada

Miisaaniyadda 2020 waxay muhiimad weyn siinaysaa tayada adeega waxbarashada gaar ahaan dugsiyada dowladda, taasi oo ka muuqata korodhka loo kordhiyay Miisaaniyada Wadaagaha waxbarashada **34%**. Meelaha ay mudnaanta gaarka ah siinayso miisaaniyadda 2020 ee dhanka waxbarashada waxa ka mid ah

- Kordhinta Mushaharka macalimiinta dugsiyada hoose iyo dhexe **25%**
- Qorista macalimiin cusub.
- Dhismayaasha iyo daryeelka dugsigayada dowladda
- Shaqaalaysiinta 300 oo macalin oo kuwa dugsiyada hoose, dhexe iyo sare ah
- Dhismayaasha dugsiyada farsamada gacanta
- Tayaynta kuuliyadda tobabarka macalimiinta

- Ku darida saamiga dowladda laga rabo Mashaariicda adeega Waxbarashada kor loogu qaadayo ee Dayaxa iyo laascaanood, kuwaasi oo laga maalgalinayo sanduuqa Somalind development fund (SDF) iyo Miisaaniyadda dowladda dhexe

6.3.6. Biyaha

Miisaaniyadda 2020 waxay muhiimad gaara siinaysaa wax ka qabadka baahiyaha biyo yaraanta ee ka jirta deegaanada dalka, si hadaba loo yareeyo baahiyaha biyo yaraanta waxa la kordhiyay Miisaaniyadda Wasaaradda Horumarinta Biyaha **65%**.

Mashaariicda Biyaha

- Qodista ceelasha
- Biyo xidheeno
- Sand dams
- Dareeylka iyo tayaynta ceelashii hore

6.3.7. Garsoorka

Sidaan wada ognahay Cadaaladu waa mid ka mid ah tiirarka ugu weyn ee Nabada, isla markaana loo baahan yahay in la daryeelo oo la tayeeyo. Xafiisyada bahda Garsoorka Waxa Miisaaniyadda 2020 loo qoondeeyay kharash wax lagaga qabanayo baahiyaha Xafiisyada bahda garsoorka taasi oo isugu jirta Daryeelida Xafiisyada Maxkamadaha hoose, Maxkamada sare iyo Xafiisyada Xeer ilaalinta Guud.

6.3.8. Maamul Daadajinta.

Waxa Miisaaniyadda 2020 mudnaan gaara ay siinaysaa maamul daadajinta, taasi oo la doonayo in adeegyada kala duwan ee dowladdu si fiican u wada gaadho dhamaan deegaanada Jamhuuriyadda Somaliland.

Sidaa awgeed, waxa miisaaniyadda 2020 loo qoondeeyay kharash loogu talo galay fidinta Maamul daadajinta, taasi oo badi Wasaaraddaha iyo Hay'adaha kala duwan ee dowladda loo galiyay dhismayaal ay ka dhisanayaan gobolada iyo degmooyinka dalka, halka qaar kale oo badana loo galiyay kharash kiro ijaar oo ay ku kiraystaan Xafiisyada Gobolada iyo Dagmooyinka.

Sidoo kale, siyaasada Miisaaniyadda 2020 waxay mudnaan siinaysaa Mashaariicda maamul daajejinta ee ay ka wada shaqeeyaan dowladdaha hoose iyo dowladda dhexe, isla markaana dowladdu ku dartay Miisaaniyadda 2020 qoondadii laga rabay Mashaariicda maamul daadajinta ee (JPLG), waxa kale oo Dowladu si gaara kharash ugu qorshaysay sadex degmo oo barriga ah oo aan Mashruuca JPLG hore ugu jirin, balse Dowladdu fulin doonto

6.3.9. Horumarinta Dhalinyarad iyo Shaqo abuurka

Miisaaniyadda 2020 waxay muhiimada gaara siinaysaa Horumarinta Dhalinyarada iyo shaqo abuurka, sidaa daraadeed waxa Miisaaniyadda 2020 looga qoondeeyay qoondo loogu talo galay in lagu horumariyo dhalinyarada isla markaan lagu yareeyo shaqo yaraanta sida:

- Shaqaalaysiinta 1,400 oo dhalin yaro ah, kuwaas oo dhamaystay Mashruuca Shaqo Qaran iyo qaadashada 700 oo cusub oo loo qaadanayo Shaqo Qaran.
- Dar-dar galinta Sanduuqa horumarinta dhalinyarada kaasoo sanadkii hore la aasaasay joogtan noqon doona.
- Dhamaystirka Garoonka ceerigaabo
- Dhismaha Garoonka Caynabo
- Dhismaha Garoonka Oodweyne
- Dhismaha Garoonka Baligubadle

- Qabashada tartanka koobka gobol
- Dhamaystirka garoonka laascaanood
- Fidinta iyo tayanta Xafiisyada shaqo abuurka ee job centers-ka

6.3.10. Warshadaha iyo Maalgashiga

Warshadahu waxay door laxaad leh ka qaataan kobaca dhaqaala dalka iyo shaqo abuurka, sidaa awgeed waxa Miisaaniyadda 2020 ay mudnaan gaara siinaysaa Maalgashiga dalka dibadiisa iyo gudahiisa (investment) iyadoo wixii Maalgashiya dowladdu u fududayn doonta dhamaan wixii dowladda ku xidhan sida bilaabida maalgashiga (ease of doing business).

Sidoo kale, waxa Miisaaniyadda 2020 ay si gaara mudnaanta u siinaysaa samaynt dhul dowladdu leedahay oo loogu talo galay warshadaha (**Industrial Zone**). taasi oo wax weyn ka tari doona baahidii helida dhulka iyo yaraynta kharashka abuurida Ganacsiga (**start-up cost**)

6.3.11. Ilaalinta Deegaanka iyo ku talo galka Dhacdooyinka lama filaanka

Miisaaniyadda dowladda ee 2020 waxay mudnaan gaara siinaysaa ilaalinta deegaanka, hadaba si loo helo deegaan bad qaba oo ka fayow afooyinka dhibta ku haya deegaanka waxa Miisaaniyadda 2020 loo qorsheeyay mashaariic horumarineed oo wax lagaga qabanayo deegaanka sida:

- Mashruuca wax ka qabadka xaalufka
